

# SR 900

## Daraasadaynta Qorshaynta Wado Soo Koobitaan Go'aanka Fulinta

### Hordhac



**S**tate Route SR 900/Martin Luther King Jr. Way South ee bulshada Skyway-West Hill ee aan la wadaagin waa wado mashquul badan oo u dhaxaysa Renton iyo Seattle taas oo u adeegta safarada deegaanka iyo kuwa rakaabka, xamuulka, gaadiidka, baaskiil wadayaasha, iyo dadka lugaynaya. Jidka SR 900 wuxuu bulshada Skyway u kala qaybiyya laba qaybood. Daraasadan la beegsaday waxay diirada saaraysaa qaybta SR 900 ee u dhaxaysa 57th Avenue South (milepost 7.51) iyo South 135th Street (milepost 8.46) waxayna ciwaan ka dhigtaa oo ay diiwaangelisaa la'aanta baaskiilka iyo goobaha dadka lugaynaya oo dhamaystiran, oo si wada jir ah loo yaqaan gaadiidka shaqeeya. Daraasadani waxay sidoo kale tixgelinysaa badqabka wadada, hawlahaa, waxqabadka iyo arimaha deegaanka. Si loo qiimeeyo kuwan, warbixinta shilka, qaabaynta taraafikada iyo baarista deegaanka ayaa la dhameeyay.

### Bulshada Skyway Community

**B**ulshada Skyway Community waa bulsho kala duwan ee degan yihii oo ku taal buurta dhinaceeda koonfureed ee Lake Washington. Wuxa kale oo ku jira degmo ganacsi oo u dhow xarunteeda iyo sidoo kale laba xaafadood oo laga dukaameysto oo geska bari iyo galbeed.

King County waxay kormeertaa qorshaynta qaybtan aan la wadaagin ee King County ee u dhaw magaalada Renton. Qayb kamid ah mas'uuliyadaha qorshaynta King County Skyway-West Hill Community waxa kamid ah diyaarinta qorshaha guud ee isticmaalka dhulka.

### Jardiinooyinka SR 900

SR 900 waxay noqon isku xiriirinta tooska ah ee Interstate 5 ilaa Skyway Community iyo Magaalada Renton. Wadada SR 900 waxay leedahay xawaare la dhejiyay oo ah 50 mayl saacaddii laga bilaabo I-5 ilaa Renton Xadadka magaalada, oo kaliya dhanka bari ee xadka daraasadda. Celceliska taraafikada maalinlaha ah (ADT) ee wadadu

waxay u dhaxaysaa 21,000 bari ee koonfurta 129th Street ilaa 13,000 galbeed ee South 135th Street. Waxaa jira isgoysyo calaamadeysan oo ku yaal qaybtan SR 900 ee Koonfurta 129th Street iyo 68th Avenue South. Tani sidoo kale waa marin gaadiid mashquul ah, waxaana u adeega wadooyinka tareenada Metro ee King County 101 iyo 102. Labada wado ee gadiidka waxay bixiyaan rakaab toos ah adeegga u dhexeyya Renton iyo badhtamaha Seattle ee ka baxa boosteejooyinka baska ee South 129th Street iyo inta u dhaxaysa 68th Avenue South iyo South 135th Street.

Baaxada SR 900 ayaa ka maqan gaadiid oo firfircooni waxayna leedahay xulashooyin isgoys oo xaddidan. Waxaa si gaar ah xusid mudan maadaama inta badan SR 900 ay xuduud la leeyihii xaafado la degan yahay iyo dhismayaal dabaqyo ah, isticmaaleyaashanna waxay leeyihii ikhtiyaarro xaddidan oo ay ku socdaan, baaskiilkii ku wadaan, ama ku rogaan boosteejooyinka gaadiidka iyo suuqyada bulshada.

## Wacyigelinta Bulshada / Daraasada Daneeyayaasha

Kooxda daraasadda waxay sameeyeen wacyigelin ay u sameeyeen xaafadaha ee saamaysay, wakaaladaha, iyo dadka degan ee isticmaala SR 900. Xubnaha bulshadu waxay wadaageen waayo-aragnimadooda, waxay aqoonsadeen walaaca iyo xalal macquul ah, waxayna bixiyen jawaab-celin intii lagu jiray habka daraasadda ee wadada. Sababtoo ah istaraatijiyyadda ka qaybgalka bulshada waxaa xadiday cudurka caalamiga ah ee COVID-19, dhamaan wacyigelinta bulshada illaa Gu'gii 2022 waxay ahayd mid khadka fogaan araga ah. Midan waxa kamid ahaa kulanada gudiyada daneeyayaasha ee casriga ah, wicitaanada taleefoon qof-qofka ah oo lala yeeshay xubnaha degmooyinka, iyo bandhig furan oo khadka toosk ah iyo sahan. Gudiga daneeyayaasha ayaa kulmay labo jeer, iskaashatada waxaa kamid ahaa: Adeegyada Deegaanla/qorshaynta ee King County, King County Metro, magaalada Renton, Renton School District, Washington State Patrol, West Hills Community Association, Puget Sound Regional Council (PSRC), iyo qabaa'ilada dhaladka ah. WSDOT waxay martigalisay guriga furan ee khadka tooska ah iyada oo loo adeegsanayo Engage WSDOT websaydka, kaas oo bixiyay khariidado marin, dulmar xaaladaha jira, xogta shilalka la isku daray ee 2015 ilaa 2019, iyo sahan khadka tooska ah. Kooxda daraasaddu waxay xayysiisay bandhiga khadka tooska ah iyo sahanka iyada oo loo marayo hababka soo socda:

- Baraha bulshada iyo liistada iimaylka ee la sameeyay
- websaytka WSDOT
- Boodhadhka lagu diro boostada oo loo diro in ka badan 3,000 oo guri kulano lagu qabto gobta daraasada
- Dawlada hoose, iskaashatada qabaa'ilada dhalad ah, iyo ururada bulshada ku salaysan ee ku xiritaanka oo dakhligoodu hooseeyo iyo Ingiriisi xaddidan dadka aqoonta u leh

Bandhiga furan iyo sahanka - oo lagu bixiyay Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali iyo Fiyatnaamiis - ayaa gaaray dhagaystayaal kala duwan iyadoo ay ka qaybgaleen dad da' kasta leh oo ka kala s oo jeeda isir, dhaqan, iyo dhaqaale kala duwan oo badan. Bandhiga furan ee khadka tooska ah waxaa la daalacaday 3,188 jeer, sahankana waxaa buuxiyay 196 jawaab bixiye kuwaas oo la wadaagay macluumaadka ku saabsan sida iyo sababta ay u isticmaalaan wadada. Afar mawduuc oo muhiim ah ayaa ka soo baxay sahanka wacyigelinta ee SR 900, kuwaas oo kala ah la'aanta wadooyinka dadka lugaynaya, xawaarahar darawalka ee xad dhaafka ah, ciriiriga SR 900, iyo nal la'aanta hareeraha wadada.

Deyrta/iilaalka 2021, kooxda daraasadu waxay isticmaaleen jawaab-celinta si ay u horumariyaan liis qabyo ah oo xeelado oo loo soo bandhigay Guddiga Daneeyayaasha Gu'ga 2022 iyada oo qayb ka ah habka qiimaynta fikradda. Kadib soo jeedintan, waxaa jiray walaac laga soo saaray laba ka mid ah xeeladaha qabyada ah: kala wareegyada South 129th Street iyo isgoyska cusub ee dadka lugeynaya ee u dhow Creston Point Apartments. Wacyigelin dheeri ah ayaa la sameeyay si loo raadiyo jawaab-celin xeeladahan oo ka koobnayd dhacdooyin shaqsi ah iyo kulamo khadka tooska ah. Jawaab celinta waxaa loo adeegsaday si dib loogu eego xeeladaha.

### Istaraatijiyyadaha Hormarinta:

Waxaa la sameeyay qorshayaal dhow iyo kuwa muddo dhexe ah iyadoo lagu salaynayo xogta la hayo iyo talooyinka bulshada iyo daneeyayaasha. Istaraatijiyyadaha horumarinta muddada dhow waxay diiradda saareen wax ka qabashada walaaca laga qabo xawaarah, nalalka, xarumaha gaadiidka ee shaqeeya, iyo dadka lugaynaya isgoysyada. Ujeedadu waa in la beddeelo jawiga waditaanka si loo helo meel dejin iyo soo dhawayn iyadoo la horumarinayo gelitaanka dhammaan isticmaleyaasha. Diiradda dhexe ee daraasada aeyaa ah hormarinta badqabka iyo helitaanka halkii wax looga qaban lahaa ciriiriga.

Xeeladaha horumarinta dhow iyo kuwa dhexe ee lagu taliyay waxaa kamid ah:

### Istaraatijiyyadaha Mudada Dhaw:

- **Dhimitaanka Xawaare:** Laga soo bilaabo South 129th Street ilaa 68th Avenue South, WSDOT waxay baari doontaa suurtgalnimada dhimitaanka xadka xawaarah. Midan ayaa loo hirgalin doonaa iyadoo ah talaabo ku meelgaar ah oo wax looga qabanayo xawaarah wadada waxaana wehelin doona daraasad xawaaro ahaaneed oo ay samaysay WSDOT.

Laga 68th Avenue South ilaa dhinaca bari ee South 135th Street, WSDOT ayaa ka samaynays adhimitaanka xawaarahay iyadoo la xiriirta xalka mudada dhaw ah.

- **Calaamadynta iyo Astaamaynta:** WSDOT waxay baaraysaa ku daritaanka xarijimaha astaamaha isgoysyada yaryar ee ku teedsan wadada, midaas oo laga yaabo inay abuurto dhex-rooryo isgoysyada oo ciriir ah si ay u gaabiyaan leexinta baabuurta halka ay dadka lugaynayay ka gudbayaan.

- **Hormarinya Isgoysyada Lugu Lugeeyo:** Wadada 129th Street, horumarintu ku meel gaarka ah Isgoysyada lugaynta waxa ka mid noqon kara dhisitaanka askari jiifa oo cusub meelaha baska laga soo baxo si xwaaraha looga yareeyo dadka lugaynaya ee goynaya SR 900.
- **Goobta Dejinta ee Baska Dugsiga:** WSDOT, oo kaashanaysa Renton School District, King County Local Services, and King County Metro, ayaa samaynaysa inay dejiso xalal mudo gaaban si wax looga qabto walaacyada badqab ahaaneed boostajada baska dugsiga hoose SR 900 ee ku yaala Creston Point Apartments.

### Istaraatijiyadaha Mudada Dhexe:

- **Kala wareega ku yaala isgoyska SR 900 iyo South 129th Street:** Kala wareeg leh Isgoysyada lugaynta hormarsan ayaa ah istaraatijiyadda lasoo jeediyay ee horumarinta muddada-dhexe ee isgoyska SR 900 iyo South 129th Street. Talo soo jeedintan waxay wax ka qabanaysaa Walaaca ay muujisay xogta, gaar ahaan taariikhdi shilka, iyo sidoo kale mudnaanta

ay aqoonsatay bulshadu, baahida loo qabo in la horumariyo wadooyinka ay dadka ku lugeeyaan oo badqab leh, iyo baahida loo qabo in la dhimo xawaaraha baabuurka ee SR 900. Inta waxaa sii dheer, kala wareeg ku yaala South 129th Street ayaa noqon kara albaabka laga galoo Skyway-West Hill bulshada.

Jawaab celinta bulshada ee la helay wejigii labaad ee wacyi-galinta ayaa muujisay baahida loo qabo ka qaybgalka joogtada ah ee bulshada Skyway West Hill inta lagu jiro qorshaynta mashruuca, naqshadeeynta, iyo dhismaha si loo hubiyo hormarinta isgoyska ugu dambeintii wax ka qabashada soo kordhay ee gaadiid gaar ah caqabadaha la xiriira xamuulka iyo gaadiidka iyo ku daraya Aragtida beesha ee albaabka Skyway-West Hill. Xarunta jasiiradda waxa kale oo ay hoyan doontaa barta xudunta u ah oo ay samaysay bulshada Skyway-West Hill.



# SR 900

## Qeypta 1-4



Qeypta 1: Inta u dhaxaysa 57th Street South iyo South 129th Street




Qeypta 2: Inta u dhaxaysa South 129th Street iyo 64th Avenue South

- Wadooyinka lugaynta oo Dhamaystiran ee ku yaalaa SR 900:** Hormarinta kale ee weyn ee lasoo jeediyay SR 900 ee ku yaalaa Skyway-West Hill community waa samaynta xarumo gaadiid oo shaqaynaya inta u dhaxaysa South 129th Street iyo South 135th Street, iyo dhamaadka daraasada.

Xarumaha lasoo jeediyay waxaa kamid ah ugu yaraan wadooyinka lugaynta oo Dhamaystiran ee ku yaalaa SR 900 ee ku yaalaa Skyway-West Hill community waa samaynta xarumo gaadiid oo shaqaynaya inta u dhaxaysa South 129th Street iyo South 135th Street, iyo dhamaadka daraasada. Xarumaha lasoo jeediyay waxaa kamid ah ugu yaraan wadooyinka lugaynta oo Dhamaystiran ee ku yaalaa SR 900 ee ku yaalaa Skyway-West Hill community waa samaynta xarumo gaadiid oo shaqaynaya inta u dhaxaysa South 129th Street iyo South 135th Street, iyo dhamaadka daraasada.



Qeypta 3: Inta u dhaxaysa 64th Avenue South iyo 68th Avenue South



Qeypta 4: Inta u dhaxaysa 68th Avenue South iyo South 135th Street

maaraynaysaa u helida oo iftiimaysay dadka lugaynaya iyo baaskiil wade Wadada la wadaago ayaa la doorbidayaa dhinaca woqooyi sababta oo ah tirada yar ee wadooyinka gawaarida iyo tirada badan ee meelaha loo tago waqooyiga SR 900.

Dhanka koonfureed, xarumaha lagu taliyey ee waxaa ku jira ugu yaraan 6-talaabo oo wadooyinka lugaynta oo leh ugu yaraan 2-talaabo oo xakamaynta saxmada ah. Balaca wadooyinka lugaynta ee koonfurta waxay ku kordhin doontaa goobaha iyadoo loo eegayo macnaha isticmaalka dhulka.

- **Calaamad cusub oo Saxmada iyo Wadada Lugeynta ee cusub Isgoyska la hormariiyay:** WSDOT waxay soo jeedinaysaa inay ku rakibto South 133rd Street si loo dhimo shilalka ka dhaca isgoyskan iyo ku dar isgoys cusub oo calaamadaysan. Waxaa sidoo kale oo jira wadada lugaynta cusub oo la hagaajiyay oo lagu taliyay oo u gudbaysa Creston Point Apartments si ay ugu xiriiriso dadka deegaanka ah boostaajada baska ee eastbound ee hormaraysa o Creston Point Apartments iyo boostaajada la raray ee westbound. Jawaabcelinta laga helay wacyigalinat wajiga labaad ayaa muujisay muhiimada raritaanka boostaajada westbound si ay ugu dhowaato boostajaada baska eeastbound, oo leh isgoys cusub ee dadka lugaynaya oo noqonaya isku xirka boostaajada sii jirtay ee eastbound iyo mida la rayay ee westbound iyo qabashada shaqada isku mar.

## Qeybinta

Sababtoo ah qiiamaha guud ee la filayo ee fikradaha lagu taliyay, waxay u badan tahay inay u baahan doonaan in loo qaabeeeyo oo loo fuliyo qeybo. Hoos waxaa ku qoran ikhtiyaarka qeybaha ee suurtagalka ah iyo dayactirka qiyaasta heerka qorshaynta.

- **Wajiga A:** Wado la wadaago oo leh xakameeyaha saxmad ee dhinaca waqooyi ee SR 900, isgoyska lugaynta ee cusub ee ku yaala Creston Point Apartments, boostaajada baska westbound ee lasoo raray, ka saaritaanka meelaha baska istaago e ue dhow Creston Apartments, South 133rd Calaamada

taraafikada wadada iyo isgoysyada dadka lugeynaya. Qiyaasta kharashka waa \$20.71 milyan.

- **Wajiga C:** Kala wareega ku yaala South 129th Street. Qiyaasta kharashka waa \$5.781 milyan.
- **Wajiga C:** Wadooyinka lugaynta ee Buffered ee dhanka koonfureed ee SR 900. Qiyaasta kharashka \$12.801 milyan.
- **Dayactirka:** Qiyaasta kharashka \$19.646 milyan.

## Talaabooyinka xiga

Daraasada Qorshaynta Wadada ee SR 900 ee Skyway iyo waqooyiga Renton waxay kusoo gabagabawday diyaarinta warbixinta daraasadda ugu dambeysa oo leh natijjooyin muhiim ah iyo talo soo jeedin. Talooyinka ay soo jeedisay daraasadda ayaa sidoo kale lagu daabacay websaytka WSDOT si ay uga daalacdaan dadweynaha iyo tixgelinta.

Kooxda daraasada WSDOT waxay sii wadi doontaa la shaqaynta iskaashatada maxaliga ah (King County, Renton, King County Metro, Sound Transit, Puget Sound Regional Council, Skyway-West Hill Community, iyo kuwa kale) in loogu daro natijjooyinka iyo talooyinka qorshayaasha deegaanka iyo gobolka sida ku habboon.

Talaabo kale ee hirgalinta oo la sii wado 2023 iyo wixii ka dambeeya waxay noqon doontaa in la raadiyo fursadaha deeq lacageedka si dib u habayn dheeraad ah iyo ugu dambaynta dhisidda xeelado lagu taliyey loogu fuliyo. Laakiin wakhtiga dhow, baahiyaha maalgelinta degdega ah waa in la dhammaystiro habaynta xeeladaha daraasadda muhiimka ah.